HIRAAL INSTITUTE
ADDRESSING HORN OF AFRICA'S SECURITY CHALLENGES

Cashuur uruurinta AS waa mid baahsan: ganacsiyada iyo saraakiisha dawladduba waa ay bixiyaan cashuurta. Qaabka cashuur uruurinta ee kooxdu waa mid aad uga hufan kuwa Dawladda Federaalka iyo Maamul Goboleedadaba.

Dedaalkii Guuldaraysanayay:

Ladagaalanka Nidaamka Maaliyadeed ee Al-Shabab

Hiraal Institute

Machadka Hiraal wuxuu hiigsanayaa inuu noqdo hormuudka xarun-cilmiyeedka amniga ee Soomaaliya. Iyada oo laga ambaqaadayo khibrada amni ee xubnaheeda, ujeedadeedu waa in la dhiirrigeliyo nabadgelyada Geeska Afrika oo dhan iyo in la helo Soomaaliya oo nabad ah.

Hiraal Institute

Muqdisho, Somalia

www.hiraalinstitute.org

info@ hiraalinstitute.org

Oct 2020

Horudhac

Wax badan ayaa is badalay mudadii ka dambaysay warbixintii Mac-hadka Hiraal sannadkii 2018 ka diyaariyay nidaamka maaliyadeed ee AS[1]. Awoodda cashuur ururineed ee kooxdu waa ay horumartay, cabashooyinka ku saabsan sida ay meelo cusub ugusii fidayaanna waa sii kordhayeen ilaa xilligaa. Sidaa daraadeeed, daraasaddan waxaa loo sameeyey si loo fahmo sida xaalka ururku yahay xilligaa wixii ka dambeeyey, waxa ay noqotay saamaynta falcelintii dawladdu, iyo waliba waxa la samayn karo si loo xakameeyo maaliyadda ururka.

Xogaha lagu soo bandhigay daraasaddani waa qaar ku salaysan waraysiyo dhacay inti u dhaxeysay Juun ilaa Oktoobar 2020 oo lala yeeshay tiro ganacsato ah oo dhan 70 qof, shaqaale dawladeed, iyo wakiilada hay'adaha aan dawliga ahayn ee ku sugan Mogadishu, Maamul Goboleedka Koonfur Galbeed, Hirshabeelle, Jubbaland, iyo Puntland. Intaa waxa dheer, xiriir lala sameeyey saraakiil katirsan Al-Shabab (AS) loo fahmo aragtidooda arinta ku aaddan. Arrimahan waxa aanu u aragnay in ay ku filanyihiin in ay sawir guud naga siin karaan qaabka AS cashuurta uga uruuriso Soomaaliya guud ahaan. Waraysiyada waxaa loo qaaday hab shakhsi ah; keliya waraysiyada lala yeeshay AS ayaa la qaaday iyada oo la adeegsanayo taleefan.

AS waxa ay cashuurtaa inta badan shirkadaha waaweyn; iyada oo cashuurtanina tahay Zako sanadkii laga qaado iyo lacago bille ah[2]. Qabiilooyinka kusugan iyo ganacsiyada ka jira meelaha AS ka taliso ayaa iyana laga qaadaa lacago loogu yeero *Infaaq* xilliyada dawladda hoose ee dagaanka lacag yaraani soo food saarto[3]. Kooxdu waxa ay haysataa keyd lacageed oo buuran, iyada oo arrintanina ka dhigayso "dawladda" keli ah ee gaartay guushan cajiibka ah. Inkasta oo cashuurtu sanad kasta sii kordhaysay, hadana mushahaarooyinku isma ay beddelin, hawlgalada ciidan ee kooxdu samaysaana lamay kordhin. Tan macnaheedu waxa weeye in kooxdu haysato dhaqaale dheeri ah. Daraasaddani waxa ay iftiimin iyo sharaxaad ka bixin doontaa halka lacagtan dheeriga ahi ku dambayso.

In cashuur lasiiyo AS ma aha mid ku salaysan mutadawacnimo, iyada oo waxa ay isku wada raacsanyihiin inta badan cashuur bixiyayaashuna tahay in ay jeclaan lahaayeen in ay jiri lahayd hal cid oo cashuur qaaddaa: taas oo ah dawladda Soomaaliyeed. Cabsi iyo halis dhab ah oo soo waajahaya noloshooda ayaa ah waxa keliya ee cashuur bixiyayaasha ku dhiirigeliya in ay u hogaansamaan bixinta cashuurta AS. Jawiga ganacsi ee ka jira Soomaliya waa mid adag: in aanay

[1]Eeg " Habka Maaliyadda ee AS ", *Hiraal Institute, 2018,* URL: https://hiraalinstitute.org/the-as-finance-system/
[2] Sarkaal katirsan AS oo kusugan Marerey, Ogoosto 2020.
[3] Isla sarkalkaas

awooddu ku urursanayn gacanta dawladdu meelaha ay ka taliso ayaa toos uga masuul ah in AS ku guulaysato in ay cashuurta ka uruuriso goobahaas. Ganacsiyadu waxa ay ka cawdaan in dawladdii abuurtay xaaladda ay labada cashuurood kusiinayaan laba dawladdood oo is garab yaal ay haddana ku ciqaabto in ay dhibane u noqdaan xaaladdaa.[4]

Waxa loo baahan yahay hab dhamaystiran oo lagu waajaho nidaamka maaliyadeed ee kooxda iyada oo la marayo hab aan caqabad ku noqon ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Habka hadda dawladdu adeegsataa waa mid aan miro dhal ahayn isla markaana aan ku guulaysan xakamaynta cashuuraha AS uruuriso. Daraasaddani waxa ay muujinaysaa sida loogu baahan yahay hab dhammaan dawladda heerarkeeda iyo noocyadeeda kala duwani wada adeegsadaan kaas oo lagula taacalayo arrintan, iyada oo lala kaashanayo ganacsatada.



Jaantuuska 1aad - Sahaminta ganacsiyada lacagta siiya AS iyo kuwa aan siin.(Toban magaalo walba)

[4] Ganacsade kusugan Mogadishu, Oktoobar O 2020.

Cashuuraha AS uruursato waxa suuro galiya in aanay ganacsatadu haysan cid amnigooda si buuxda u dammaanad qaadda dalka intiisa badan. Gacanyarayaasha kooxdu waxa ay ka hawlgalaan intabadan magaalada Mogadishu, oo ay ku jirto agagaarka Villa Somalia; inta badan Bosaso iyo Jowhar; iyo, in intaa hore ka yarna, inta badan Baidoa iyo Kismayo. Sidaa daraadeed, ganacsiyada ka hawlgalaha meelaha ay adagtahay in AS ka hawlgasho waxa u suuragal ah in ay diidaan dalabyada kooxda ee dhanka bixinta cashuuraha. Inkasta oo kooxdu wacdo, una hanjabto ganacsatada meelahaas ku sugan, hadana waxa suuragal ah in inta badani diiddo dalabyadooda. gaar ahaan hadii aanay dano ganacsi ka lahayn deegaannada AS ka taliso ama aanay baahi u qabin in ay maraan meelaha ay ka taliyaan.[5]

Dhammaan shirkadaha waaweeyn ee ka jira Koonfurta Soomaliya waxa ay siiyaan AS Zakada sanadlaha ah; keliya ganacsiyada yaryar ee jidadka hareerahooda ku ganacsada isla markaana aan buuxin shuruudaha Zakada ayaanay cashuur ka qaadin kooxdu.[6] Si kastaba ha haatee, ganacsiyada qaar ka hawlgala meelaha AS ka taliso ee aan bixin Zakada ayaa bixiya cashuuro bille ah oo ay siiyaan maamulada AS ee ay hoos tagaan.[7] Ganacsiyada waxa lagu cashuuraa dekedda; alaabooyinka ay sidaanna waxaa la cashuuraa marka ay dalka isaga gudbayaan iyada oo gaadiidka sida alaabtana gaar loo cashuurayo; sidoo kale waxa sanadkii laga qaadaa cashuur u dhiganta 2.5% hantida u ururtay dadka; dalagga beeraha waxaa la cashuuraa marka uu soo go'o iyo marka la gadayo labadaba; iyada oo hay'adaha aan dawliga ahaynna loo cashuuro hab waafaqsan mashaariicdooda.[8]

AS waxa ay cashuur ka qaaddaa dhammaan hawlaha ka socda deegaannada ay ka taliso, ilaa xad aan beeralayda loo ogolayn in ay isticmaalaan webiga iyo kanaaladiisa haddii aanay bixin cashuurta gaarka ah ee waraabka beeraha.[9] Sidoo kale, way yartahay in la arko ganacsade diidaya in uu bixiyo cashuurta meelaha laysku hayo ee ciidamo ka joogaan kooxda, cidda diidaysa cashuurtu waa in ay joogto meel aanay u suurta gal ahayn in kooxdu hawlgal ka fuliso.[10] Cashuurta in la diido ayaa ah wax aan cidi ku dhiiran karin marka la fiiriyo meelaha ururku ka taliyo; qofkastaa wuu bixiyaa cashuurta.[11]

[5] Ganacsada alaabooyin soo dejiya, Kismayo, Luuliyo 2020.
[6] Sarkaal katirsan AS oo kusugan Jamame, Ogoosto 2020.
[7] Sarkaal katirsan AS oo kusugan Jamame, Ogoosto 2020.
[8] Ganacsade soo dejiya qalabka Elegtaroonigga, Mogadishu, Luuliyo 2020, Sarkaal ushaqeeya NGO, Mogadishu, Ogoosto, 2020, iyo Sarkaal AS ah oo kusugan, Ogoosto 2020.
[9] Sarkaal AS ah oo kugan Fidow, Luuliyo, 2020.
[10] Sarkaal katirsan AS oo kusugan Jamame, Ogoosto 2020.
[11] Lamid.

Marka laysku daro cashuuraha ay qaadaan Dowladda Federaalka (DFS) iyo Maamul Goboleedyadu (MG), waa ay ka yaryihiin kuwa ay qaaddo AS; sidaas oo ay tahay, haddana gaadiidka xamuulku wax ay doorbidaan in ay bixiyaan cashuurta AS iyada oo sababtuna tahay in ay tahay wax hal mar la bixiyo oo aan dib la isu waydiinayn inta aad socoto dhulka ay ka taliyaan, oo ah dhulka baadiyaha ah intiisa badan.[12] Nidaamka cashuuraha ee AS waa ka horumarsan yahay kana baahsan yahay marka la barbardhigo MG-yada cusub sida HirShabelle; kooxduna waa ay ka warqabtaa isla markaana cashuurtaa dhammaan hawlaha ganacsi ee la xiriira hantida maguurtada ah.[13] Nidaamka cashuurta ee dawladdu waa mid aan rasmi ahayn isla markaana aan la ixtiraamin ilaa xad sarkaal dawladeed oo siiyay AS lacag cashuur ah oo dhan $800 aanu wax cashuur ah ka siin dawladda isla hawshaas uu AS cashuurta ka siiyay.[14]

AS waxa ay awooddaa in ay garato cashuurta ay ka qaadayso ganacsi waayo waxa ay manifeestada wax soo dejinta ka heshaa shaqaalaha dawladda, gaar ahaan kuwa ka shaqeeya dekedda; AS waxa ay u adeegsataa xogtan faahfaahsan si ay u dalbato cashuurta kastamka ee dhammaan wixii la soo dejiyay.[15] Ganacsiyadu waa ay ku kalsoon yihiin bixinta cashuurta AS iyada oo sababtuna tahay in ay u arkaan in AS wixii la isku ogyahay aanay ka bixin; kuwa cashuurta bixiyaa waxa ay xor u yihiin in ay aadaan halka ay rabaan, halka kuwa diidaana mutaan ciqaab noloshooduna halis gasho.[16]

Qaybo ganacsi kale oo aad u kobcaya isla markaana ay cashuuro xooggan kooxdu ka qaado ayaa ah ganacsiga hantida ma guurtadda ah. Ganacsigani waa mid si dhaw ururku ula socdo iyaga oo u arka in u yahay mid muhiim ah. AS waa ay ka warqabtaa dhammaan iibabka la xiriira ganacsiga; hantiilaha ayaa kooxdu u yeertaa, “waxa la siiyaa macluumaadka iibkii dhacay, waxaana lagu amraa in uu bixiyo lacago aan gorgotan lahayn, hantiilayaashuna waxa ay bixiyaan wixii AS dalbatay”.[17]

Qaabka AS u uruuriso cashuuraha

[12]Dareewal gaari xamuul ah wada, Jowhar,Ogoosto 2020.
[13]Sarkaal HirShabelle katirsan, Jowhar,Ogoosto 2020.
[14]Sarkaal HirShabelle katirsan, Ogoosto 2020.
[15]Ganacsade waxsoo dejiya, Kismayo, Luuliyo 2020.
[16]Qof kaganacsada Xoolaha, Kismayo, Luuliyo 2020.
[17]Dillaal dhulka iyo guryaha ah, Kismayo, Luuliyo 2020.



Jaantuuska 2aad - Qaababka ay Cashuurta ugu Ururiso Gobollada kala duwan

AS hal taleefan lambar oo kaliya ayay u wada adeegsataa laxiriirka ganacsatada iskudeegaanka ahba marka la gaaro xilligii cashuur bixinta.[18] Ganacsadaha shaki ka galo in cidda la soo xiriirtay tahay AS waxa uu sida caadiga ah la xiriiraa cidda hadba ay qaraabo yihiin ee ku jirta kooxda, si ay u hubiyaan cidda la soo xiriirtay ka hor inta aanay fulin awaamirta.[19] Cashuur uruurinta waxa loo sameeyaa qaabab kala duwan, iyada oo ku xiran xaddiga lacageed ee la uruuriyay iyo goobta ganacsigu ku yaal. Meelaha ay gacanta ku hayso kooxdu ama meelaha laysku haysto ee *Amniyaatku* ka hawlgalaan, cashuur uruuriyaashu waxa ay si toos ah ugu tagaan ganacsatada waxaanay ka dalbadaan in ay bixiyaan cashuurta; meelaha kale, iyo marka lacagtu badan tahay, lacagta waxa loo dhiibi karaa ganacsade ururku soo magacaabay ama waxa lagu shubaa xisaab bangi. [20]

Waxa jira xubno AS ah kuwaas oo iska dhiga in ay ganacsato yihiin isla markaana shaqadoodu tahay in ay fududeeyaan uruurinta iyo dhaqdhaqaaqa lacagta. Tusaale ahaan, qof ganacsade ah oo raba in uu lacago ka xawilo meelo ay AS ka taliso ayaa lacagta u dhiiba xafiiska maaliyadda ee AS, kaas oo isna u tilmaama ganacsade kale oo AS xiriir laleh kuna sugan dhulka dawladdu ka taliso, kaas oo ganacsadihii hore siiya lacagtiisii isaga oo kubixinaya lacag cashuur ah oo uu kasoo qaaday ganacsade kale.[21] Qaabkan, dhaqdhaqaaqa lacagtu waa mid xadidan, kooxduna waxa

[18]Qof shaqaale dawladeed ah Jubbaland, Kismayo, Luuliyo 2020.
[19]Qof shaqaale dawladeed ah, Jubbaland, Kismayo, Luuliyo 2020.
[20] Sarkaal ka tirsan oo kusugan Fidow, Luuliyo 2020.
[21] Sarkaal ka tirsan AS oo kusugan Jilib, Luuliyo 2020.

ay awood u leedahay in ay ku baal marto (kaga badbaado) inta badan tallaabooyinkii loogu talagalay in lagu dabro cashuur uruurintooda.

Shakhsiyaadka magacyadooda xisaabaadka baananka AS ku furataa waa kuwo ay aad ugu kalsoon yihiin islamarkaana/ ama leh dammaanad. Sababtu waa in kooxda ay marar hore lacag kaxadeen dad xisaabaad u hayay.[22] Hab kale oo lacagta AS lagu gaarsiiyo ayaa iyana ah in ganacsade AS ku xiran (xiriir laleh) kana hawlgala dhulka dawladdu ka taliso uu lacagta u xawilo ganacsade kale oo AS ku xiran kuna sugan dhulka AS ka taliso isaga oo u marinaya habka xawaaladda.[23]
Dhanka qaybinta, lacag bixinta inteeda badan waxa lagu sameeyaa habka e-money, laba sababood oo muhiim ah awgood: ugu horayn, dadka Alshabaab mushahaarooyinka siisaa waa ay baahsanyihiin suuragalna ma aha dhanka amniga iyo dhan kaleba in ay fayl galaan marka ay lacagooda qaadanayaan; ta labaadna waa in ay fududahay in hanti dhawris lagu samayn karo xafiiska maaliyadda.[24]

Inkasta oo qaar ka mid ah lacagaha la siinayo AS lagu sameeyo iyada oo lacagaha lagu shubo akoonnada bangiyada, bangiyada ayaa u hoggaansamaya xeerarka jira. Kuwa haysta koontooyinka waxay bixiyaan aqoonsi sida sharcigu qabo, waxayna soo sheegaan wax kala iibsiyo laga shakiyo iyo kuwa waaweyn. Hay'adaha waaweyn ee maaliyadeed ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan bangiyada iyo xawaaladuhu, waxay u hoggaansamayeen xeerarka ay dejisay FRC / CBS iyadoo la raacayo sharciga AML-CFT, sida ay sheegtay AG ee FRC.[25]

Cashuur intee le'eg ayay AS qaaddaa

Marka la isku wada daro, cashuuraha bishii kooxdu uruurisaa ugu yaraan waa $15M, taas oo in kalabar ka badani ka soo xarooto Mogadishu.[26] Marka la fiiriyo baahsansanaanta iyo qotoda cashuuraha kooxdu uruuriso marka la barbardhigo DF iyo MG yada ka jira koonfurta Soomaliya, waxa aan malaynaynaa in qiyaastani tahay ta ugu yar. Xaaladaha intooda badan, qaaciidada kooxdu u adeegsato qiimaynta cashuurta ay qaadaysaa waa tu la mid ah ta dawladda; si kastaba ha ahaatee, marka lagu daro ilaha cashuurta ee ay dawladda la wadaagto, waxa ay iyadu dheertahay ilo kale oo cashuureed oo aanay dawladdu lahayn. Lacagaha 2.5% ka ah ee ah zakada sanadlaha ah ee maalka qofka, cashuurta dalagga beeraha, iyo cashuuraha iibka dhulka iyo horumarinta ayaa

[22] Sarkaal katirsan AS oo kusugan Kurtunwaarey, Luuliyo 2020.
[23] Sarkaal AS katirsan oo kusugan Fidow, Luuliyo 2020.
[24] Sarkaal AS katirsan oo kusugan Jilib, Luuliyo 2020.
[25] Amina Maxamed, Agaasimaha FRC, Oktoobar 2020.
[26] Sarkaal ka tirsan oo kusugan Fidow, Luuliyo 2020; Sarkaal katirsan AS oo kusugan Jilib, Luuliyo 2020; iyo Sarkaal katirsan AS oo kusugan Kurtunwaarey, Luuliyo 2020.

u gaar ah AS waana kuwo u dhigma ta dakadaha laga uruuriyo, oo ah isha ugu muhiimsan ee cashuurta dawladda.[27]

Qaabka AS ula tacaasho cidda diidda in ay bixiso cashuurta

Xaqiiqdii dhammaan ganacsatadii la waraystay intii daraasaddani socotay waxa ay u arkayeen in cashuuraha AS yihiin qaar adag, aan cadaalad ahayn, isla markaana sharci darro ah. Mid ka mid ah cashuur bixiyayaasha waaweeyn ayaa ku tilmaamay cashuurta AS hawl ay wadato "koox maafiyo ah oo ka xuubsiibatay iska yeelyeelka in ay yihiin koox Islaamiyiin ah ".[28] kooxdu waa mid arxan daran marka la fiiriyo qaabka cashuur uruurinta; nin beeralay ah ayaa ku cawday in lagu qasbo in uu bixiyo cashuurta hawlaha ee cagafcagaftiisa xataa xiliyada aanay wax hawl ah qabanayn cagafcagaftiisu ee ay cillado farsamo u fadhido.[29]

Shakhsiyaadka diida in ay bixiyaan cashuurta AS waxa lagu qasbaa (qasab ku noqota) in ay xiraan ganacsiyadooda, beddelaan xogta ciwaanka lagala xiriirayo ama ka cararaan dalka.[30] Cadaadiska noocan ah waxa xamili kara keliya shakhsiyaadka ku nool meelo ka fog goobaha AS gaari karto. Mararka qaar waxa dhacda in AS ku qasabto ganacsiyada in ay bixiyaan cashuurihii sanado tegay oo aanu ganacsigu u diwaan gashanayn kooxda. Ganacsiyada hadda la diiwaangaliyay ayaa lagu qasbaa in ay bixiyaan cashuuraha sanadkan iyo tii kii tegay.[31] Xaaladaha dhif iyo naadirka ah, sida marka cashuur bixiyuhu gabi ahaanba diido in uu bixiyo cashuurta ay AS go'aansato in ay ku leedahay, waxa ay dil qorshaysan ku fulisaa ganacsadaha diiday in uu bixiyo cashuurta la saaray. Marka arrintan la fiiriyo, inta badan ganacsatadu waxa ay u aragtaa in dantoodu ku jirto in ay bixiyaan cashuuraha AS.[32]

Saraakiiisha dawladda ee bixiya cashuurta AS

Arrinta iftiiminaysa sida cashuuraha AS u yihiin kuwo baahsan ayaa ah in saraakiisha dawladdu ay cashuur siiyaan kooxda, saraakiishaas oo ay ku jiraan saraakiisha sarsare ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (XDS) ee aanay halista tooska ahi kaga soo wajahnayn kooxda. Xaaladaha

[27] Iyada oo dawladdu gacanta ku hayso cashuuraha dhulka, haddana waa mid dayacan, islamarkaana way yar tahay in la ururiyaa.
[28] Ganacsade kusugan Mogadishu, Sebtember 2020.
[29] Qof beeraley ah oo kusugan Jowhar, Luuliyo 2020.
[30] Shaqaale dawladeed, Mogadishu, Luuliyo 2020.
[31]Ganagsade alaabta soo dejiya, Mogadishu, Luuliyo 2020.
[32] Qof maqaaxi haysta, Mogadishu,Ogoosto 2020.

hoos lagu xusay waxa ay tilmaamayaan in lacagaha lasiiyo AS aanay wax xiriir ah lalahayn aqoonsiga sharciyadda kooxda, ee ay xiriir la leedahay waaqaca nololeed ee jira, kaasoo ka dhigaya mid aan suuragal ahayn in wax ganacsi ah laga sameeyo meelaha ay kooxdu ka hawlgasho.

Waxa jira saraakiil dawladeed oo siiya AS qayb ka mid ah mushaharkooda si aan kooxdu u bartilmaameedsan.[33] Qaar ka mid ah ganacsiyada dawladda qandaraasyada ka qaataa waxa ay cashuur siiyaan AS si ay u ilaashadaan danaha ganacsi ee ay ku leeyihiin goobaha AS ka arrimiso iyo goobaha AS iyo dawladdu isku haystaan.[34] Qaar ka mid ah shaqaalaha dawladdu waxa ay AS cashuur ka siiyaan dakhligooda, iyaga oo rajo ka qabo in ay ku badbaadi doonaan.[35] Sidoo kale, saraakiisha leh ganacsiyo waxa ay cashuur siiyaan AS si hawlahooda ganacsi ugu suuro galaan.[36] Sidoo kale, AS waxa ay lacagta diiwaangalinta oo dhan $1000 kaqaaddaa saraakiisha dawladda hoose markasta oo ay diiwaan geliyaan boosas dhul ah.[37]

Tusaale aad u xiiso badan ayaa ah taliye ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo cashuur siiya AS. Waa arrin xiiso leh una qalanta in loo wariyo sida ay tahay.

> “Si kastaba ha ahaatee, waxa aannu mararka qaar la kulannaa xaalado ay qasab nagu noqoto in aan cashuur siino AS. Aan idinla wadaago sheeko ku saabsan lacago aan u diray AS iyada oo aan dhanka kalena dagaal joogto ah kula jiro. Bishii tagtay waxa aan bilaabay in aan guri dhisto. Injineerkii guriga ii dhiisayay waxa uu ii sheegay in si joogto ah loogu soo dirayay taleefanno iyo hanjabaado isdaba joog ah oo uga imaanayay AS taasoo lagu farayay in uu dhismaha joojiyo ama cashuurihii ku waajibay ka soo qaado hantiilaha guriga leh. Waa aan diiday in aan cashuurta bixiyo waayo wax cabsi ah kama qabin AS. Maalmo ka dib waxa joogsaday gebi ahaanba hawlihii dhismaha waayo waxa shaqada ka tagay injineerkii. Waxa aan u yeeray injineer kale isla markiiba, hase ahaatee injineerkii cusbaana waxa lagu bilaabay wicitaanadii iyo hanjabaadihii kii hore oo kale. Gaadiidkii usoo qaadayay agabka dhismaha guriga ayaa iyana lagu qasbay in ay joojiyaan alaabooyinkii ay ii keenayaan. Ugu dambayntii waxa qasab igu noqotay in aan ama joojiyo dhismaha ama bixiyo cashuurta AS. Waxa arrin aad looga xumaado ah in aan siiyay kooxda $3600 gurigaygiina sidaa iigu dhammaaday”. [38]

[33] Sarkaal katirsan AS oo kusugan Jamame, Ogoosto 2020.
[34]Shaqaale dawladeed oo kusugan Jubbaland, Kismayo, Luuliyo 2020.
[35]Shaqaale dawladeed oo kusugan Jubbaland, Kismayo, Ogoosto, 2020
[36] Sarkaal katirsan AS oo kusugan Fidow, Luuliyo 2020.
[37]Diwaangeliye dhuleed, Mogadishu, Luuliyo 2020.
[38]Taliye ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka, Mogadishu, Luuliyo, 2020.

Adeegyada AS siiso dadka ay cashuuraha ka qaaddo

AS waxa ay xalisaa muranada ganacsatada dhexyimaadda, gaar ahaan marka ganacsi cabasho ka soo gudbiyo ganacsiyo kale. Kooxdu waxa ay cashuurtaa waxyaalaha dhoofaya waliba heer aan la mid ahayn ka DF/MGyada, taa badalkeedana waxa ay siisaa adeegyo aasaasi ah dadka wax dhoofsanaya. Tusaale ahaan - waxa ay nidaamisaa wax soo saarka (miraha waddanka kabaxa) ee la dhoofinayo sida liinta iyada oo hubinaysa in aan cidina dhaafin xaddigii ururka beeralaydu u qoondeeyay.[39] Adeeg kale oo muhiim ah ayaa isna ah damaanadda dhinaca amniga ee ay siiso cashuur bixiyayaasheeda; cashuuraha lagu bixiyo meel uun ka mid ah meelaha cashuuraha lagu qaadaa waxa ay damaanad qaadaysaa in si nabad galyo ah lagu maro dhulka ay ka taliyaan oo dhan; iyo waliba badbaadada meelaha hawlgalada ciidan kasocdaan ee dawladdu gacanta ku hayso.

Si kastaba ha ahaatee, ganacsatadu waxa ay ka cabataa in adeegyadaa kor kuxusani aanay ku fillayn marka la fiiriyo lacagaha laga qaado. Adeegyadaa la soo sheegay looma arko in ay uqalmaan cashuuraha badan ee ganacsatadu bixiso, sida laga arki karo natiijada waraysiyada laga qaaday ganacsadata ee hoos ku cad.



Jaantuuska 3aad – Ganacsatadu inay ku faraxsan yihiin waxa loogu beddelo cashuuraha ay siiyaan AS

[39] Ganacsade dhoofiya liinta, Jowhar, Ogoosto 2020.



Jaantuuska 4aad – Boqolkiiba ganacsatada u aragta in cashuuraha AS qaaddaa yihiin kuwo sharci ah.

Qaabka Dawladdu uga Jawaabtay

Jawaabta dawladda Soomaaliya ka bixisay nidaamka maaliyadeed ee AS ugu horayn waxa uu noqday Xeerka Ladagaalanka lacagaha la dhaqo iyo Ladagaalanka Maalgelinta Argigixisada (AML-CFT) iyo xeer nidaamiyeyaasha lagu dul dhisay xeerkaas. Si kastaba ha haatee, sidii aan soo aragnay, AS kuma guulaysan oo keliya in ay la timaaddo qaabkii ay ula tacaali lahayd tallaabooyinkaas, waxayse xataa kasii hordegaysaa tallaabooyinka xigi kara ee dawladdu la imaan karto. Intaa waxa dheer, qaar kamid ah nidaamyada la dejiyay waxaa caqabad ku noqday jiritaan la'aanta waraaqo dhalasho oo muwaadiniintu leeyihiin. Waraaqahaa dhalashadu waxa ay muhiim u noqon kari lahaayeen xakamaynta iyo la socodka xawilaadaha yaryar ee legtaroonikada, kuwaas ah kuwa ugu balaaran iminka marka la eego lacagaha lagu bixiyo baraha kaantaroollada..

Tallaabada xigta ee dhanka cashuur uruurinta ee kooxda, ee aanay dawladduna wax saamayn ah (xakamayn) ku lahayn ayaa ah lacagta teleefanka la isugu xawilayo iyo lacagaha loo xawilo deegaannada AS ka taliso. Si taa la mid ah, lacagaha baananka la dhigo iyo kuwa la xawiloba waxa la sameeyaa iyada oo aan wax dhokumenti ah lasocon - tanina waa kor-joogtayn aanay masuul ka ahayn hay'adaha maaliyaddu, balse ku yimid afkaarta oo ku yaraatay dawladda iyo iyada oo lagu guul daraystay in la ansixiyo xeerarkii ku haboonnaa. In la ansixiyo nidaamyadii ku adkayn lahaa kooxda dhaqdhaqaaqa lacagta, bixinta mushahaarooyinka, iyo uruurinta cashuurta iyada oo la adeegsanayo nidaamka maaliyadeed waxa uu xanibi doonaa in ay u sii shaqeeyaan habkan iminka jira. Ugu yaraan, hirgalinta talooyinka daraasadani waxa uu ka dhigi doonaa lacagaha ay AS siiso

kuwa u dagaalama mid aan suuragal ahayn, waxa kale oo uu ku adkayn doonaa bixinta deynta iyo in ay usii shaqeeyaan sida ay haatan u shaqeeyaan iyo isticmaalka hababka ay adeegsadaan xilligan.

Xeerarka oo keli ahi kuma yeelan doonaan saamayn aad u weeyn lacagaha AS hadii aanu garab socon nidaam iyo jawi amni oo meesha ka saara awoodda ay u leeyihiin in ay u hanjabaan iyo in ay ciqaabaan cidda diida in ay bixiso cashuurtooda. Ganacsiyada iyo shakhsiyaadka waxa aad u suurogal ah in ay diidaan cashuurta AS meelaha xaaladda amni tahay mid laysku halayn karo, isla markaana ay kooxda ku adagtahay in ay hawlgal ka fuliyaan. Sidaa daraadeed, amnigu waa arrin aad muhiim u ah dhanka ku dhiirigalinta in ganacsiyadu diidaan cashuuraha AS. Sidii aan soo aragnay, taliyeyaasha sarsare ee ciidanka ayaa lagu qasbay in ay lacag siiyaan AS; sidaa daraadeed suuragal iyo maangal toona ma aha in aan ka fillo in shacabku naftooda halis ku geliyaan diidmada lacagta AS la siinayo.

Gunaanad

Arrin aad u muhiim ah oo usuuro gelisa in AS cashuur uruursato ayaa ah awoodda ay u leedahay helidda waraaqaha dekedda alaabta lagaga soo caddeeyo (manifest) marka ay doonaan, iyaga oo ka helaya dadka dawladda ugu jira ee lashaqeeya. Sidaa daraadeed, ganacsatada way ku adagtahay in ay ka qariyaan hawlahooda kooxda, marka taa lagu daro awoodda kooxdu u leehay in ay hawlo ka fuliso meelaha magaalooyinka ah, way ku adagtahay in ganacsatadu diiddo in ay bixiyaan lacagta kooxdu rabto. In ay dadka ku cashuurto meelaha dawladdu ka arrimiso iyo in ay xeerarka ururka ka shaqaynayaan aagagaasi, waxa ay wiiqi karaan sharciyadda dawladda iyo inay maamulkeedu kadhexshaqeeya dawladda.

AS cashuuraha ay qaaddaa waa la mid ama waa ka badan yihiin kuwa Dawladda Federaalka iyo Maamul Goboleedyada ka jira koonfurta Soomaliya. Waa cidda keli ah ee cashuur ka uruursata baadiyaha, tanina waxa ay siisaa marin iyo saamayn aanu nidaam kale oo Soomaaliya ka jiraa lahayn. Dhanka kale, in ay tirokoobto dadka ku dhaqan miyiga iyo hantida ay haystaan uma suuragaliso oo keliya kooxda in ay uruursato cashuur, waxayse sidoo kale siisaa sharciyad, waayo cashuur uruursigu waa calaamad in sharciyadi jirto. Si kastaba ha ahaatee, uruurinta cashuurta ee magaalooyinka aanay kooxdu gacanta ku wadahayn maamulkooda waxa inta badan loo arkaa mid sharci darro ah. Cashuur bixiyayaasha keliya ee degan magaalooyinka ee cashuurta AS u arkayay mid sharci ahi waa baabuurta xamuulka qaada cidda leh. Sababtuna waa in ay ku heleen cashuurtaas adeegga ay u baahan yihiin: sida amni iyo in ay si nabadgelyo ah ku maraan dhammaan

deegaannada kooxdu ka arrimiso. Dhammaan ganacsatada kale waxa ay u aragtaa cashuuraha AS kuwo sharci darro ah.

Inkasta oo iska caddahay in ay la imaan doonaan qaab ay ula macaamilaan tallaabooyinka lagu xakamaynayo, haddana waxa aan rajaynaynaa in baaxadda cashuur uruurinta iyo qaabka ay u siiyaan lacagta cidaha u shaqeeya ay soo gaari doonto dhaawac weeyni. Waxa ay noqon doontaa in ay si toos ah cashuurta u ruursadaan, tanina waxa ay halis galin doontaa kuwa lacagta u uruuriya waxaana fashilmi doona meelaha ay cashuurta ku uruursadaan. Intaa waxa dheer, in ay gaabis galin doonto uruurinta, iyo weliba bixinta lacagaha lagaaray waqtigii ay iska bixin lahaayeen. Marka dambana tani waxa ay saamayn doontaa awooddooda hawl fulineed iyo xawaaraha ay wax ku wadaan. Dadka lacagaha kala baxsanaya ayaa sii kordhi doona waxaana yaraan doona lacagta ay haystaan mudada fog.

Xeerka Ladagaalanka lacagaha la dhaqo iyo Ladagaalanka Maalgelinta Argigixisada (AML-CFT) hadda ayaa la dhaqan geliyay, inkasta oo AS dhawr tallaabo ah ka horayso. Talooyinkayaga *gaarka ahi* waa qaar khuseeya daneeyayaasha sidaa daraadeedna waa qaar looga dan leeyahay in looga hortago tallaabooyinka ay haatan uga hortagaan iyo kuwa la filayo in ay isticmaalaan marka xeerarka AML-CFT dhaqangal noqdaan. Si taas lamid ah, waxa aan ku talinaynaa in muddo diyaar garaw ah la siiyo ganacsatada iyo hay'adaha maaliyadda si ay u dhaqan geliyaan tallaabooyinkan ka hor inta aanay dhaqan gal noqon. In aan wakhti ku fian la siinini waxa ay waxyeelo u horseedi doontaa ganacsiyada, iyada oo sababtuna tahay in in ka badan 50% ganacsiyada yaryari yihiin qaar ku diwaan gashan qof magiciis ee aan u diiwaan gashanayn ganacsi ahaan.[40] In la dhaqangeliyo talooyinkani kama hortagi doonaan oo keliya maalgelinta argagixisada, waxayse horumarin doontaa cashuuraha dawladdu uruursato, taas oo ah ujeedada la rabo in lagu gaaro AML-CFT .

[40] Sarkaal sare oo katirsan bangi oo kusugan Mogadishu, Sebtembar 2020.